



# Xeerka Cashuuraha Moorka

Xeer Lr: 85/96

13/3/96

Madax waynaha Jamhuuriyadda

Amar Qaraar.

Qaybta 1aad

Xeer tilmaameedka Guud

*Turjume: Aadan Ceelaabe Xadi*

### Qod.1

Ka dhaqan galka dhuleed ee Cashuurta Cashuurta moorka waxa la saari doonaa qoraalada xeerkan ku xusan oo dhan ka jira ama laga dhaqmo dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliland.

### Qod 2

#### **Aasaaska qiimaynta**

1. Cashuurta moorka marka loo eego qoraalada ku xusan qodobka 6aad, waxa la saari doonaa qoraal kasta oo dhab ahaan jira ama lagu dhaqmo.
2. Cashuurta moorka marka loo eego qoraalada ku xusan qodobka 7aad, waxa la saari doonaa qoraalada sida sharciga ah loogu sameeyo wax isdhaafsiga mulkiyadda ama lahaanshaha badeeco in lacageed kayd lacageed ama isdhaafsiga la xidhiidha badeecadda ama kaydka lacageed ee ka baxaya ama ku socda dalka Jamhuuriyadda Soomaaliland.

### Qod 3.

#### **Dadka laga hubinayo.**

1. Cashuurta moorka ee xadidan waxa la saari doonaa qofka shakhsiga ah ama qaynuuniga ah, ha ahaado dawli ama mid gaar ahaaneed oo qoraya, qoraal ahaan u soo saaraya ama xusan qodobka 6aad ee xeerkan.
2. Cashuurta moorka ee saamiga quman isku ah (Proportional) waxa la saari doonaa dadka waajibaadka lacag bixineed lagu leeyahay ama badeecadda qaadanaya, ama damaanad qaadka lacageed oo noqonaya waxyaabana qoraalada ku xusan ee qodobka 7 aad ee xeerkan.
3. Wax isdhaafsi kasta oo dawladdu qayb ka tahay iyada oo ay jiri karto inuu jiro heshiis liddi ku ah, hadana cashuurta moorka waxa mar walba la saaraya dhinaca kale.

#### Qod 4

##### **Dabeecadooda Cashuurta**

1. Cashuurta moorka waa mid xaddidan ama dheeli tiran (Saami quman isku ah).
2. Cashuurta xasdiddan waxa lagu saari doonaa tacriifo kaliya qoraalada iyo dokumentiga dabeecadooda u gaarka ah waxana sida badan cashuur ahaan loogu waajibin doonaa mid kasta oo qoraalka ama dokumeentiga ka mid.
3. Cashuurta dheeli tiran xisaabinteeda waxa lagu salayn doonaa boqolay go'an oo la saarayo qiimaha la cashuurayo ee qoraal ka ama dokumentiga.

#### Qod 5

##### **Sida loo bixinayo Cashuurta**

1. Cashuurta moorka ee lagu yeesho noocyada kala duwan ee qoraalada ama dokumentiga sida ku qeexan qodobada xiga, waxa lagu bixin doonaa sedan:-
  - a) Hab caadi ah, iyada oo la isticmaalayo warqadda tigidhku ku dhex calaamaysan yahay eek u xusan qodobka 11aad.
  - b) Hab aan caadi ahayn, iyada oo lagu dhajinayo tigidhka amaba uu ku daabacan yahay.
  - c) Lacag ahaan, iyada oo lagu bixinayo Cashuurta intay tahay xafiiska Cashuuraha dadban ama xafiis kasta oo loo idmado in lagu qabto.
2. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu amri karaa in Cashuurta moorka lagu bixiyo lacag ahaan si waafaqsan nidaamyada loo dajiyay arin kasta.

#### Qod 6

Cashuurta xadiddan qoraalada iyo dokumentiga ay ku waajibto tacriifada Cashuurta

Cashuurta xadiddan waxa lagu saari doonaa tacriifooyinka ku qeexan hoos iyo habka lagu dajiyay qodobka hore ee qoraalada iyo dokumentiga soo socda:-

##### **1. Qoraalada madaniga.**

- a) Asalka iyo nuqulka qoraalada mucaamalaadka nootaayada laga xaqiijiyay ama xafiis kale oo rayid oo loo idmaday inuu xaqiijiyay

- qoraalada noocaas ah, iyo farshaxanada ku lifaaqan ama ka mida qoraaladaas waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisy yahay SH.SL.
- b) Asalka iyo nuqulka gaar ahaaneed, ha ahaado hal dhinac, laba dhinac ama dhinacyo badan oo khuseeya abuurista wax ka badalka, baabiinta isku wareejinta ama xuquuqiinta nooc kasta iyo dabeecad kasta ha la haadee oo ay ka mid yihiin qaansheegyada iyo balan qaadyada badeecada waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL.
  - c) Asalka iyo qoraalada waxa la soo naqilay ama xeerarka macnawiga ah, qoraalada, qoraalada farshaxanka, dokumentiga, diiwaanada buugaagta iyo dokumentiga la midka ah oo ah xafiis dadwayne ama dawleed waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL.
  - d) Asalka iyo nuqulka balan qaadyada lacageed lacag qabashada badeecadaha iyo amarada badeecadda lagala baxayo bakhaarada waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL.
  - e) Asalka iyo nuqulka warqadaha laga dalbanayo xawilaada, nuqulka warqadaha ganacsiga waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL.
  - f) Lacag qabashada aan ahayn kuwa ku xusan faqradda afraad ee qodobka 16aad waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL\_\_\_\_\_warqad kasta.

## 2. Qoraalada Maamulka Khuseeya.

- a) Cabashooyinka, dacwadaha iyo qoraalada rasmiga ah ee khuseeya ee goobaha maamulka la hor keeno ee aan maxkamadaha aan loo soo gudbin, maamulkaas oo ah xubin kasta oo dawladda ah ama tan hoose waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL
- b) Iyo nuqulka shahaadooyinka tesdiiqidda cadaynmaha, axdiyada shatiyada, ruqsadaha, ruqsadaha hawl fulinta, diploomaha, warbixinada dugsiyada, ruqsadda baabuur wadidda oo ay bixiyaan xafiisyada dawladda dhexe ama tan hoose ama hayad dad wayne oo diiwaaniyaha dadwaynuhu u xil saaray, waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL oo xaashu walba ah.

## 3. Qoraalada Garsoorka

1. Xeerka iyo qaraarada madani ama arima maamul ah ahaadaane, oo ay bixiyaan xubnaha garsoorka, xitaa hadii ay arimuhu leeyihiin waji isxilqaan, oo ay ka mid yihiin qoraalada xusuus dhigaalka ee

dhexdhexaadinta waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL.

2. Dokumentiga, shahaadada, diiwaanada farshaxanada, xusuus dhawrada xisaabaadka warqadaha war isgaadhsiinta minguurinta iyo dokumentiska kale ee qoran ee dabeecada kasta leh iyo nooc walba leh, ee lagu soo bandhigo kiisaska madaniga ama maamulka oo ay ka mid yihiin nuqulada iyo xusuus dhawrada look ala dirayo dhinacyada kiisaskaasi khuseeya waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL.
3. Xusuus dhawrada khuseeya xalinta ciqaabaha qofka maamul oo ah dambi fudud waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH.SL xaashi walba.
4. Shahaadooyinka iyo qoraalada la bixiyo oo aan la xidhiidhin kiis oo ay bixiyaan maamulka garsoorku kaaliyayaasha maxkamadaha saraakiisha maxkamadda ay siiyaan shaqaalaha kale ee hoose ee garsoorka oo khuseeya arrimo madani, maamul ama ciqaab, waxa lagu sharciyaynayaa tigidh qiimihiisu yahay SH. SL.

#### **4. Qoraalada iyo dokumentiga asaldooku dibadda yahay.**

Qoraalada iyo dokumentiga asalkoodu dibadda yahay oo ku beegma darajooyinkan midkood eek u xusan qodobkan, arrimahan oo kale cashuurta qoraaladaas waxa la bixinayaqa shan iyo toban casho gudahood laga bilaabo maalinta ay dalka soo galeen Jamhuuriyadda Soomaaliland.

#### **5. Manifeska marakiibta.**

1. Manifeska maraakiibta soo galid iyo bixid ee ah kuwa mara waxadda leh tigidh qiimihiisu yahay SH. SL ama (\$ 200).
2. Maanifeska gali iyo bixid ee marakiibta kale oo ay ku jiraan doonyaha mara waaxdda leh tigidh qiimihiisu yahay SH.SL sms lacag cadaan oo dhan (\$40).

#### **6. Diiwaano iyo buugaagta xisaab maalmeedka.**

1. Diiwaanada nootaayooyinka ama xafiis kale oo dadwayne sida waafaqsan sharciga tigidh qiimihuhu yahay SH.SL.
2. Buugta xisaab maalmeedka ku xusan qodobka 20 ee qararkan sharciga tigidh qiim. SH.SL 100 kii xaashadoodba.

### Qod 3

#### **Dadka laga hubinayo**

1. Cashuurta moorka ee xadidan waxa la saaridoodnaa qofka shakhsiga ah ama qaynuuniga ah, ha ahaado dawli ama mid gaar ahaaneed oo qoraya qoraal ahaan u soo saaraya qoraalada ku xusan qodobka 6aad ee xeerkan.
2. Cashuurta moorka ee saamiga quman isku ah (Proportional) waxa la saari doonaa dadka waajibaadka lacag bixineed lagga leeyahay ama badeecadda qaadanaya ama damaanad qaadka lacageed oo noqonaya 7aad ee xeerkan.
3. Wax isdhaafsi kasta oo ay jri karto inuu jiro heshiis liddi ku ah hadana cashuurta moorka waxa mar walba la saarayaa dhinica kale.

### Qod.7

#### **Boqolayda dheeli tiran ee cashuurta qiimaha ay ku waajibtay:-**

##### Tacriifada Cashuurta.

1. Boqolayda dheeli tiran ee lagu qaado moorka dakhliga (S/Duty) ama moorka qaansheegga (S/Tax) oo ku xidhan nooca iyo dabeecadda dokumentiga waxa lagu saari doonaa 2 % qiimaha dokumentiyadan, marka laga reebo xaashida mushaaroyinka oo tacriifada Cashuurtiisu tahay 1 %.
  - a) Qaansheegyada xaashiyada lacag xeraynta lacag xaraynta, lacag qabashada eek u xusan qodobka 16 iyo dokumentiga la midka ah ha la fuliyo ama yaan la fulin.
  - b) Dalabyada lacageed iyo qaansheegyada ganacsi goor kasta ha ahaado bisaylkooda laga dalbayo ama laga bixinayop dalka gudhiisa.
  - c) Dalabyada dabeecadaha fasaxyadooda marka ay gooni ka yihiin cadaynta dhigaalka khidmadda hawsha iibka iyo daynta kale ee lagu heshiiyay dokumentigooda sharciga ah ee la xidhiidha qaadarooda lacageed.
2. Haddi dokumentiga ku xusan faqradda hore ay asalkoodu yihiin dibadda cashuurta moorka ee dokumentigaas waxa lagu bixin doonaa 15 casho gudahood laga bilaabo maalinta ay dalka soo galeen.
3. Boqolayda dheeli tiran ee cashuurta dokumentiga ku xusan faqradda hore waa inuu ka mid noqdaa cashuurta dakhliga, waxa shardi ah inuu dakhligu ku

cadyahay warqad isku mida ama waa in cashuurta ku muujisan tahay cadaynta korkeeda garantiiga iyo cadaymaha kale ee la midka ah.

4. Iyada oo ujeedadu tahay adeegsiga boqolayda dheeli tiran, jjabka boqolayda waxa lagu dhamaystirayaa boqol.

#### Qod 8

##### **Jurubka**

1. Cashuurta moorku waxay ku waajibaysaa turubka dhinacyadiisu ka balaadhan yihiin (32X45MM), oo lagu cashuurayo baakadiiba SH.SL.
2. Cashuurtana waxa lagu bixinayaa qaab aan caadi ahayn iyada oo tigidhka lagu dhajinayo yeekaha hadhiin ee nooc walba.
3. Cashuurtana waxa qaadaya xafiisyada furdooyinka moorka badeecadda laga saarayo furdada ama xafiisyada cashuuraha dadban.

#### Qod.9.

##### **Dadka Cashuurta ka daysan.**

1. Haddii aanu faqradda 3aad ee qodobka 3aad si kale u dhigin, dawladdu way ka daysan tahay cashuurta la xidhiidha dokumentiga ku xusan qodobada 6aad iyo 7aad ee loogu tala galay ama loo sameeyay lagu codsanayo ama looga dhaqmayo danaheeda u gaarka ah ee xagga siyaasadda xeer dajinta maamulka iyo hawlaha garsoorka.
2. Hayadaha dawliga ee madaxa banana kuma jiraan cashuur ka dhaafiddan ku xusan farqadda hore.

#### Qod10

##### **Qoraalada iyo dokumentiga ka dayasan Cashuurta.**

1. KUwan soo socdaa way ka daysan yihiin cashuurta.
  - A. Dokumentiga iyo qandrasayada la xidhiidha maaraynta hayadaha samafalka ee sida sharciga ah loo aqoonsan yahay.
  - B. Cashuur dhaafyada laga gungaadhay ee qodobkan kuma jiri doonaan qoraalada garsoorka eek u xusan faqradda 3aad ee qodobka 6aad.

- C. Dokumenti kasta oo kale iyo qandraasyo ama xeer gaar yga ah dhaafay cashuurta.

### Qod I

#### Xaqiijinta iyo ururunta

#### Cutubka I

#### Qod 11

#### Sifooyinka Cashuurta moorka

- 1) Warqadda tigidhaysan waa in tigidhku ku samaysan yahay iyo waraaqaha nooc kasta waxa ku daabacnaanaya cashuurta inta ay tahay xaashi kasta dhererkeedu wuxuu noqon doonaa 30 MM baladhkeeduna wuxuu noqon doonaa 425 mm. dherer iyo guduba waxay u lahaan doonaan layman waxana ka soo baxaya 25 line oo ku eg  $\frac{1}{4}$  dhinaca midig iyo  $\frac{1}{8}$  dhinaca bidix.
- 2) Warqadda qaansheegyada iyo qaansheegyada ganacsiga waxay noqon doonaan 105 mm dherer ahaan iyo baladh ahaan oo ay noqon doonaan 250mm.
- 3) Midabka qiimaha iyo xaashida tigidhaysani sifooyinka kale ee ay kaga duwan tahay waraaqaha qaansheegyada cashuurta moorka iyo moorka dakhliga waa inay ahaato warqad tigidhaysan warqadaas qaansheegyada iyo moorka dhakhliga waxa lagu soo saarayaa qaraar wasiirka maaliyadda.

#### Qod 12

#### Xaaladaha khuseeya isticmaalka warqadda tigidhaysan

- 1) Way reeban tahay in lagu qoro meel ka baxan meesha loogu talagalay ku ekaashaha qoraalka ama laymanka la raacayo ee warqadda tigidhaysan layn kasta waa inaanuu ka badan 28 gogo erayo, waxa shardi ah oo xadidaadas la kordhin karo haddii tirade googo'a ereyada ee xaashida loo qaybiyo tirade laymanka ay noqdaan 28 ama ka yar
- 2) Marka dokumenti ama qoraal farsamo dib loo daabacaayo waxa la ogol yahay in la kordhiyo ku ekaashaha qoraalka iyada oo tilmaamaha fgaqradda hore jirto laakiin tirade ah 28 googo;a eray ee line walba isma badalayaan, laymankuna kama badanayaa loo warqad kasta.

- 3) Qoraalada tirooyinku waxay ku xasuusinayan meesha qoraalku ku egyahay sida xeerku amrayo ama ku tilnayo ama xeeridaamiyayaashu on la ogolaado.
- 4) Waxa reebanaan doona :-
  - In lagu qoro oo tigidh warqadda tigidhku ku daabacan ama ku samaysan yahay ama cabirkiisa la baddalay.
  - In lagu warqad isku mida ha ahaado asal ama nuqul laba dokumenti oo kale duwan.

### Qod 13

#### **Fulinta qaansheegyada iyo xawaaladaha.**

1. Qaansheegyada iyo xawaaladaha ay ku jiraan ku aragti lagu bixinayo iyo waliba jeegagga iyo dokumentiga asalkoodu dibadda yahay lama fulin doono haddii aan si hagaagsan loo tigidhayn.,
2. Qofka wata qaansheegyada noocaas ah ama xawaaladaha ku heli mayo xuquuqda oo ku doonayo ee la xidhiidha dokumentigaas haddii cashuurta moorka iyo wixii kale ee ganaax maamule ee kale ee la xidhiidha aan la bixin.
3. Ciladda la xidhiidha fulinta dokumentiga waxa cadaynaya garsooraha nidaam darada asalka ee la xidhiidha tigidhka waxay wax ka qaadaysaa oo kaliya qaansheegga wax isdhaafsiga marka la fulinayo, halka xuquuqaha kale ee khuseeya dokumentiga ee qofka wataa ku heli karo marka uu cashuurta dokumentiga lagu leeyahay iska bixiyo ka dib ma saamayn doonto.
4. Qaansheegga wax isdhaafsiga waa inay u dhamaystiran yihiin xaaladaha uu farayo xeerka moorku marka loo gaynayo qofka lacagtiisa bixinaya.

### **Qod 14**

#### **Ku dhajinta iyo ku daabacaadda tigidhaha.**

- 1) Ku dhajinta iyo ku daabacaadda tigidhaha waxa ka hor mari doona in wax saxiixa la saaro, xitaa haddii la tirtiro ama la badallo marka ay khusayso diiwaanada, sheekooyinka masraxiyadda iyo buugaagta tigidh ka dhajinta inay ka horaysaa qoraal galin kasta
- 2) Tigidhka waxa ku dhajinaya oo tirtiraya xafiiska cashuuraha dadban ama qofkasta oo ay khusayso, tigidhaha daabacan waxa shaabadaynaya xafiiska cashuuraha berriga dadban oo wasiirka maaliyaddu u xilsaartay arintaas.
- 3) Tigidhaha waa lagu dhajinayaa waxna lagu tirtirayaa fareemahan hoose:-

- a) Tigidhada xafiiska cashuuraha dadban tirtirayo waxa lagu dhajin karaa qayb kasta oo warqadda ka mid waxana lagu tirtiraya shaabadda taariikhda ama xafiiska, jeegagga iyo waraaqaha kale ee lacagta warqad kasta oo lacageed tigidhka waxa lagu dhajinayaa qaybta hadhaysa agteeda si qayb ka mid dhaabadda taariikhayaan ee loo isticmaalayo baabiinta tigidhku ay ugu daabacanto qaybta xaashida hadhaysa.
  - b) Tigidhada ay baabiyeen dadka ay khusayso ee dokumentiga ama meesha ugu dambaysa ee dokumentiga ama qoraalka waxana lagu baabiinayaa ugu yaraan saxiix khadle habka sida ah saxiixu waa inay qaybi ka muuqataa tigidhka qaybina warqadda, haddii qoraalka ama dokumentiga aanu wax saxiixa lahayn.
  - c) Tigidhka meel kasta lagaga dhajinayaa warqadda, waxana lagu baabiinayaa shaabad taariikh ah moorka lagu daabaco daloolinaysa, habkan oo kale taariikhdu waxay ka muuqanaysa warqadda qaybta kale waxay ka muuqanaysa tigidhka.
5. Dokumentiga ka kooban hal warqad waxa ka badan mid kastana cashuuri ku waajibto tigidhka waxa lagu dhajinayna warqad kasta xageeda sare, marka laga reebo xaashida ugu dambaysa oo tigidhka lagu dhajinayo meesha ugu dambaysa ee dokumentiga ama qoraalka, waxaana lagu tirtirayaa si waafaqsan xeerarka lagu dhigay faqradda hore.
  6. Haddii dokumentigu ka soo baxo xafiis dawladeed mid gobo lama degmo ama hortooda lagu fulinayo tigidhka waxa lagu dhajinayaa qayb kasta oo warqadda ka mida, waxana lagu baabiinayaa shaabadda xafiiska xitaa taariikh la'aan.

#### Qod 15.

#### **Waxa ka reeban ku dhajinta tigidhada.**

- 1) Wax qoraal ah oo ka ahayn habka baabinta la faray waa inaanu ka muuqan tigidhka.
- 2) Waxa waliba kale oo ka reeban:-
  - a) In lagu baabiiyo, iyada oo tigidhka kale badh loo jarayo lagu isticmaalo hadhaaga warqadaha lacagta.
  - b) In la isticmaalo tigidh aan dhamaystirnayn, ama tigidh wata calaamado muujinaya in hore loo isticmaalay.
  - c) In tigidhka lagu dhajiyu laguna baabiiyo hab aan ahayn kan la faray.
  - d) In tigidhka lagu baabiiyo taariikhda baabiinta warqadda meel dhaafsiisan tigidhka.

**Qod 16.**

**Xaashiyaha lacag qabashada caadiga iyo kuwa aan caadi ahayn.**

- 1) Qaraar sharcigani ujeedada u ka leeyahay warqadda lacag qabashada caadiga ah micnaheedu waxa weeyi cadayn kasta oo qoran, xitaa hadii ay tahay qaab qoraal galin ama daabacaad iyo tigidh aan calaamadaysnayn oo lagu talagalay in qayb ahaan ama gabi ahaan lagu bixiyo waajibaadka lacag bixineed hubaal celin laga bixiyay qaab kasta lacag ahaan ama dariiqooyin kale oo wax bixineed oo galaya meeshii lacagta.
- 2) Warqadda lacag qabashada caadiga ah waxa ka mida kuwa la xidhiidha faa'iidayin kirooyinka IWM, warqadaha lacag qabashada ee khuseeya qaansheegyada wax isdhaafsigu iyo qaansheegyada kale ee ganacsiga lacag xeraynta ama dokumentiga xisaabaadka oo in lagu helo loo bixiyo faa'iido qaybsiga iyo dheefta kor socod ee waajibka ku ah shirkadda qaamaheedu xadidan yihiin bixinta maalin goosiga lana xidhiidha bixinta ajuurooyinkooda, hadii aanay kuwaasi jirin xaashida mushahar bixinta xitaa haddii aan la saxiixin ama cadaymo cadaynayaa qaadasha maalin shaqaysiga ama bixin macaamiisha.
- 3) Haddii ay arintu tahay xaashiyo lacag bixin oo urursan wax bixinta macaamiisha warqadaha mushahar bixinta ama dokumenti kale oo la mida cashuurta warqadda lacag bixinta waxa la saari doonaa lacagta la siiyay qof kasta oo lacag lahaa.
- 4) Warqadda lacag qabashada aan caadiga ahay bixineed oo timaamaysa dhamaystirka waajibaad walba oo lacag bixineed oo ka imaanaya heshiisyo hore oo la qoray ama qoraal la galiyay oo wakhti go'an leh ama wax tilmaamaya waajibaadyo maxkamadi saartay ka daysmadooda iyo waliba warqadda lacag qabashada ee magaca iyo qiimaha lagu bixiyay hawlaha lagu fulinayo guryo ka saaridda.

## Cutub II

### Waajibaadyada Cashuurta.

#### Qod. 17

##### Qaansheegyo.

- 1) Wax isdhaafsiga badeecadaha ee ganacsatada dhexdooda, warshadlayda iyo tafaariiqlayda ganacsi waa inay ka muqataa dokumenti ku haboon oo qoraal muujinaysa lacagtu inta ay tahay oo xisaab celinta meesheeda galaysa iyo wixii kale ee soo raaca oo lagu aqoonsan karo wax isdhaafsi kasta.
- 2) Dokumentiga waxa samaynaya iibiyaha ama qofkasta oo lacagta qabanayaa.
- 3) Ganacsatada dakhligoodu ka yimaaddo tafaariiqda way ka daysan yihiin waajibaadka kore.
- 4) Qaansheegga la bixiyay ee waafaqsan tilmaamaha kore waa in si taxane ah oo isku xiga loo lambariyaa, waxana lagu samaynayaa saddex casho gudahood oo qaansheeg bixinta ama lacag gudoonka oo waafaqsanaataa bilaha sanadka.

#### Qod. 18

##### Isusamaynta qaansheegga.

- 1) Haddii 20 cisho gudahood lag bilaabo badeeca gudoonka aanu helin qofka wax iibsaday qaansheegga xusan qodobka 17aad, isagaa qaansheeg isku samaynaya oo leh sifo la mida kuna qoran yihiin waxyaabo la mida oo lagu garan karo wax isdhaafsiga.
- 2) Dokumentigan mar ka loo eego cashuurta moorka waxa sharciyaynaya iibsadaha danta xeerkan, ka leeyahayna wax weeyi waxay baddel u tahay dokumentiga asalka.

#### Qod. 19

##### Wax isdhaafsiga ganacsiga marmarka ah.

Wax iwaydaarsiga ganacsiga marmarka ah xitaa haddii uu ka dhexeeyo shakhsiyaad waxa loo aqoonsanayaa wax isdhaafsi badeeco, mar haday sidaa tahay waxa qaansheegga loo samaynayaa sida lagu faray qodobka 17 aad.

**Qod.20.****Buugga xisaab maalmeeka.**

- 1) Shirkadda leh hawlaha ganacsi ama warshadeed taa darteedna leh shatiyada ganacsi ee heerka kowaad labaad ama saddexaad oo la siiyay, waa inay lahaato buugta xisaab maalmeedka oo lagu qorayo hawl maalmeedyada socda ee shirkadda gaar ahaan dakhliyada iyo kharashyada.
- 2) Intaan loogu dhaqmin, waa in buugga la keeno xafiiska cashuuraha dadban, ama cashuuraha berriga gobolka haddii ay labaduba maqan yihiin ama xafiiska gudoomiyaha degmada kaas ku siinaya tiro taxane iyo (Page No) tigidh ku dhajinta.
- 3) Buugga xisaab maalmeedka waxa loo haynayaa si waafaqsan nidaamka xisaabaadka caadiga, iyada oo aan la dhaafayn meel banana, laymanka dhexdoodana aan waxba lagu qorayn wax xusuusyo ahna la qorayn wax ka baxsan bilawga iyo dhamaadka laynka qoraalka tirtir iyo xoqitaan iaan lagu samayn, haddii tirtir loo baahdo wax loo samaynayaa si kalmadaha la tirtirayo loo akhriyi karo.

**Qod21.****Warqadda lacag gudoonka waajibka ah.**

Iyada oo aan waxba la yeelayn tilmaamaha ku xusan qodobka 62 ee xeerka shaqaalaha loo shaqeeyaaasha waa inay ku cadeeyaan mushahar bixinta shaqaalaha warqadda lacag bixinta ama dokumentkale oo u dhigma oo cashuurta moorka eek u xusan qodobka 7aad ee xeerkan lagu bixin karo.

**Qod.22****Suurta gal la'aanta isticmaalka tigidhka.**

Haddii la waayo ama aanay oolin tigidho ku filan loo arki mayo inay xadgudub ku tahay xeerkan haddii la cadeeyo in labaduba ay si gooni ah u keenayso suurta gal la'aanta in la helo waraaqaha tigidhaysan ama tigidhada wax shardi ah in marxaladan lagu muujiyo gudaha dokumentiga, dokumentigaasna waa in loo gudbiyaa xafiiska cashuuraha dadban si loogu nidaamiyo saddex casho gudahood laga bilaabo maalinta suurta gal la'aanta kor lagu magacaabay ee jirta dhamaato.

**Qod 23.**

**Dokumentiska la hor keenayo maxkamadda ama xafiis dawlo.**

- 1) Dokumentiska ama qoraalada noocay doonaanba ha ahaadeene oo aan waafaqsanayn xaaladaha uu farayo xeerkan lama hor dhigi karo wax maxkamada ama xafiis kale oo dawladeed.
- 2) Arrimahan oo kale cashuurta moorka waxa la saarayaa taciifada markaa jirta ee wax hordhigista la samaynayo.

*Bye: Hibaag*